## SUURAT  AL-QAARICAH:

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

**1. Qaaricada    ( qalbiga garaacda )**

**2. Qaarica maxay tahay**

**3. Mase taqaannaa Qaarico**

**4. Waa Maalinta Dadka noqon sida baalallay**

**5. Buuruhuna ay noqon sida suuf kala firdhay**

**6. Ruuxiise miisaankiisa ( fiican ) cuslaado**

**7. Wuxuu ku noolaan nolol raalli ah**

**8. Ruuxiise uu fududaado miisaankiisa ( fiican )**

**9. Wuxuu u hoydaa ( Naarta ) Haawiya**

**10. Ma taqaannaa Haawiya**

**11. Waa Naar kulayl daran.**

Qur'an 101: 1-11

**Sharaxa Suuradaan:**
Maalinta Qiyaame magacya badan bay leedahay, waxayna ku tusin waynideeda siduu yidhi Sayid Cali Binu Abii Daalib. Maalintaas waana maalin Miisaan Caddaalad la taagi. Ruux walbana uu la kulmi wuxuu hormarsaday, oo ah abaal-marin Janno wanaagsan ama Naar kulayl badan.
Rasuulkii Eebe wuxuu yidhi " Naxariis iyo Nabadgelyo Korkiisa Eebe ha yeelee" : Naartiiba u dacwootay Eebeheed iyadoo leh: Eebow qaarkaybaa qaar cunay, markaasuu u idmay  laba neefsasho, mid qabowga ah iyo mid kulaylka ah, waana qabowga u daran eed heshaan xagaagii, iyo kulaylka u daran eed heshaan jiilaalkii.

Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim